




# Jiirkii dahabka ismooday







# Jiirkii dahabka ismooday

Buugga 9<sup>aad</sup> | Fasalka 2<sup>aad</sup>




Buuggan waxaa maalgaliyay hay'ada USAID Wuxaana isla diyaariiyay PACT ETHIOPIA iyo xafiiska waxabarashada DDSI. Wuxaana dib u habayn iyo daabacaad ku sameeyay hay'ada Save the children iyo wasaarada wax barashada heer federal

2008 T.I.




The CC By license lets others distribute, adjust, and build upon this work, for free or commercially, as long as credit is given to the original creation. However, any changes from the original must be indicated.


For more info please refer: <https://creativecommons.org/licenses/>




Beri baa waxaa jiray  
Jiirar badan. Maalin  
maalmaha ka mid ah ayey  
isa soo raaceen markaas  
ayey yimaadeen guri  
Bisado leeyihiiin oo aad u  
qurux badan, ayna yaalaan  
bootaro midabo badan leh.



Mid ka mid ah Jiirkii ayaa  
marsadey midab dahabi ah,  
dabadeedna wuxuu isku  
eegay muraayad guriga u  
dhextiil Bisadaha. Jiirkii  
aad ayuu isula dhacay oo  
isu maleeyey in uu dahab  
ka kooban yahay



Jiirkii kale ayaan arkay  
Bisadihii oo soo socda,  
oo intay ugaadhsii tageen  
soo hungoobay.



Jiirarkii badnaa waxay  
u digeen saaxiibkood  
oo ay ku yidhaahdeen,  
“war inaga keen meesha  
Bisadihii waa kuwane.”  
Jiirkii wuu is dhaga  
tiray oo wuxuu sii watey  
ciyaartii iyo bood boodkii.



Bisadihii ayaa u soo  
galey isaga oo muraayadii  
isku daawanaya. Si dhib  
yar inta ay u qabteen  
ayey cuneen.

Waxayna yidhaahdeen  
ma maanta ayuu Jiir  
gurigii noogu soo galey,  
anaguna duurka ayaan ka  
raadinaynay wakhti dheer.



Jiirkii saaxiibadii talada  
ka qaadan waayey  
halkaas ayaan.



